# Xorriyadda hadalka iyo booliska doorkiisa

Polisen

Dadka jooga Iswiidhan oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay cabbiraan fikirkooda, xaqa inay kulmaan iyo xaqa in la mudaharaado iyadoo aan la xakamayn ama la ciqaabin. Tani waxaa lagu magacaabaa xorriyadda hadalka waana sharci aasaasi ah kaas oo baarlamaanku go'aamiyay. Xorriyadda hadalka iyo xaqa in la mudaharaado waa u muhiim dimoqraadiyad.

Aragtiyaha la soo bandhigo maaha inay jebiyaan sharciyadda, sida tusaale ahaan in la caddibo koox dad gaar ah ama hanjabaad sharci darro ah.

**Booliiska doorkiisu waa inuu hubiyo in**

- dadka oo dhan cabbiraan fikradahooda si waafaqsan sharciyadda ansaxa ah,
- nidaam iyo amaan la raaco,
- dembi aan la gelin.

Si ay u ururaan dad xilli mudaharaad, isku soo bax dad ama kulan ka dhacaya goob guud waxaa loo baahan yahay oggolaansho laga helo booliiska.

Booliisku wuu joojin karaa ama istaajin karaa mudaharaad haddii la qabto inkastoo qofku helay diidmo ah codsigooda. Booliisku wuxuu xitaa joojin karaa ama istaajin karaa mudaharaad haddii ay timaado rabshad ama haddii mudaharaadku khatar weyn ku keeno dadka jooga ama uu aad u carqaladeeyo isu socodka gaadiidka.

Qofkii mudaharaad ama kulan ku carqaladeeya tusaale ahaan rabshad dagaal ama cod rabshad ah wuxuu geli karaa dembi. Waxaa xitaa dembi ah in booliiska laga xannibo inay gutaan shaqadooda.
Miyaad haysaa su'aalo? La xiriir booliis jooga goobta.

polisen.se


# Xorriyadda hadalka iyo booliska doorkiisa

Polisen

Dadka jooga Iswiidhan oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay cabbiraan fikirkooda, xaqa inay kulmaan iyo xaqa in la mudaharaado iyadoo aan la xakamayn ama la ciqaabin. Tani waxaa lagu magacaabaa xorriyadda hadalka waana sharci aasaasi ah kaas oo baarlamaanku go'aamiyay. Xorriyadda hadalka iyo xaqa in la mudaharaado waa u muhiim dimoqraadiyad.

Aragtiyaha la soo bandhigo maaha inay jebiyaan sharciyadda, sida tusaale ahaan in la caddibo koox dad gaar ah ama hanjabaad sharci darro ah.

**Booliiska doorkiisu waa inuu hubiyo in**

- dadka oo dhan cabbiraan fikradahooda si waafaqsan sharciyadda ansaxa ah,
- nidaam iyo amaan la raaco,
- dembi aan la gelin.

Si ay u ururaan dad xilli mudaharaad, isku soo bax dad ama kulan ka dhacaya goob guud waxaa loo baahan yahay oggolaansho laga helo booliiska.

Booliisku wuu joojin karaa ama istaajin karaa mudaharaad haddii la qabto inkastoo qofku helay diidmo ah codsigooda. Booliisku wuxuu xitaa joojin karaa ama istaajin karaa mudaharaad haddii ay timaado rabshad ama haddii mudaharaadku khatar weyn ku keeno dadka jooga ama uu aad u carqaladeeyo isu socodka gaadiidka.

Qofkii mudaharaad ama kulan ku carqaladeeya tusaale ahaan rabshad dagaal ama cod rabshad ah wuxuu geli karaa dembi. Waxaa xitaa dembi ah in booliiska laga xannibo inay gutaan shaqadooda.
Miyaad haysaa su'aalo? La xiriir booliis jooga goobta.

polisen.se